Ibb Ma Galo

# FAAFIN RASMI AH
# الجـــريدة الرســـمية

**EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA**

**لجمهـــورية الصـــومال الديمقراطيـــة**

**Sanadka 3aad** Muqdisho, 31 Disember 1974 **L. 4, R. 1**

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka**

**FAAFIN BIL SOO BAXA** **جريـــدة شـــهرية**

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar yo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOWAAD

### KOOBNIIN

SHARCI L. 53, Tr. 20 Oktoobar 1974 — *Daryeelidda Horumarinta Reer Miyiga - O.H.R.M.* Bog. 654

## BOGGA LABAAD

### XEER

W. M.

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

W. M.

# BOGGA KOWAAD
# SHARCI

**SHARCI L. 53, Tr. 20 Oktoobar 1974.**
**Daryeelidda Horumarinta Reer Miyiga - «O.H.R.M.**

GUDDOONSHAHA

GOLOHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaanshada 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Ujeedooyinka waaweeyn ee ku qoran Xaanshada 1aad ee Kacaanka ay ka mid yihiin ciribtirka aqoondarridda, kor u qaadidda garadka siyaasiga ah iyo daryeelidda caafimaadka dadka iyo xoolaha;

ISAGOO AQOONSADAY In himilooyinka lagu gaari karo aqoon cilmi iyo waayo aragnimo ka dhisan; taasoo furaheeda yahay barashada farta soomaaliyeed, gorideeda iyo hirgelinteeda ee lagu dhawaagay 1972 sii loo dhiso bulsho Soomaaliyeed oo Caafimaad gabta kuna fadhida aqoon, midnimo iyo sinnaan;

ISAGOO AQOONSADAY TIXNAGELIYAY Go'caanka Golaha Sare ee Kacaanka iyo ka Xoghaayayaasha Dowladda ee ku saabsanaa Olole in lagu qaado horumarinta Reer Miyiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Sii loohirgeliyo himilooyinka iyo siyaasadda kacaanka waxaa la bilaabayaa ollole lagu magacaabay «Ololaha Horumarinta Reer Miyga» (O.H.R.M.) ujeedadiisuna tahay in sii degdeg ah loo daryeelo horumarinta dadweynaha miyiga deggan, taasoo saldhig u ah:

1. Jamhuuriyadda Soomaalida oo qaadatay mabda'a Hantiwadagga, kuna dhaganto, shibi weynaha soomaalidana bogolkii 70 ay ku nool yihiin tuulooyin iyo xoolo dhagato yihiin; sii himilooyinka kacaanka oo curtay 21 Oktoobar 1969 kuwa ugu waaeeyn oo ah ciribtirka agoondarrida, daryeelidda caafimaadka dadka iyo xoolaha, kor ugaadka garadka siyaasiga iyo dhagaalaha waajibna nogotay in dadweynaha oo idil isla sinnaadaan lana gaarisyo dadweynaha oo deggan miyiga;

2. Xilkaa oo weyn waajib ku nogotay Dowladda Kacaanka inaay taa ku dhaqaaqdo kuna sameyso beddelaad xoog leh habka foosha xun oo ku dhisnaa jiray bulshada Soomaaliyeed waayihii dibusocodaka dalka xukumi jiray, sii loo helo bulsho Soomaaliyeed aaminsan: Mabda'a Aadamiga ah ee Hantiwadagga; sarena u qaado midnimada iyo shucuurta wa-
[illegible];

3. Dowladda Kacaanka xil iyo waajib ku noqotay in sii dhab ah u hirgeliso siyaasadda kacaanka oo ah daryeelidda danha waaweyn ee Jmmada, aqoonsiga iyo abaabulidda qiimaha umaadenna iyo khirayraadka dalka u leeyahayin gun laga gaaro, kuwaasoo ku qoran Xaashahda 1aad iyo ta 2aad in lagu dhaqaaqo waajib iyo lagamamaarmaan nogotay, Dowladdana inaay dejiso hab wacan lagu fuliyo wixii dan u ah dadweynaha.

Qodobka 2aad

Oolaha Horumarinta Reer Miyogu wuxuu ka koobmaa:

1. — waxbarashada akhrista iyo qoridda farta saamalida;
2. — daryeelidda caafimaadka dadka (daaweynta iyo ka hortagga cudurrada);
3. — daryeelidda cqfimaadka xoolaha (daaweynta iyo ka hortagga cudurrada);
4. — tirokoobka dadka iyo xoolaha;
5. — sare u gaadka wax garadka siyaasiga ee dadweynaha Soomaaliyeed sii loo helo bulsho caafimaad gabta, aaminsanna mabda'a Kacaanka midnimada, qarannimada, sinnanta iyo caddaladda.

Qodobka 3aad

Dadka loo xilsaaray inaay ka qeyb gaataan O.H.R.M. waxay ka koobnaan doonaan:

1. — ardayda;
2. — barayaasha;
3. — ciidamada qalabka sida;
4. — shagaalaha Dowladda iyo wakaaladaha;
5. — guulwadayaasha;
6. — shicbi weynaha ciddi loo baahdo.

Qodobka 4aad

O.H.R.M. wuxuu bilaabmi doonaa 1da aqosto 1974 wuxuuna dhammaan doonaa 22 febraayo 1975.

O.H.R.M. wuxuu ka hirgeli doonaa waddanka oo idil, gaar ahaanna meelaha iyo tuulooyinka ay rer miyiga degganyihiin.

Qodobka 5aad

Olaha Horumarinta Rer Miyiga wuxuu yeelan doonaa Guddiyaal loo xilsaaray dhagangelidda ujeeddooyinka Ololaha iyo kormeeridda guud ahaaneed.

Guddiyaashaas waxaa ay ukala baxsan yihiin sida soo socita:

1. — Guddiga Dhexe ee O.H.R.M.;
2. — Guddiga Gobolka;

3. — Guddiga Degmada ee O.H.R.M.

Guddiyaasha kor lagu tilmaamay waxay awood u leeyihiin sameeyaan guddiyaal hoose oo kormeeriyaal ah.

Waxaa la dhisay Guddi Joogtenta Guulaha O.H.R.M. iyo guddi Tekniko ee ka hoos shageeyo oo ay howshooda bilaaban doonto marka u dhamaado Ololaha Horumarinta Rer miyiga sida lagu tilmaamay qodobka 4aad ee Sharcigan.

Qodobka 6aad

Guddiga Dhexe ee Ololaha Horumarinta Reer Miyiga wuxuu ka koobmaa xubnaha Dowladda ee soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| 1. — | Xoghaaayaha Dowladda Wasaaradda Waxbarashada e Barbaarinta | — Guddomiye |
| 2. — | Xoghaaayaha Dowladda Wasaaradda Caafimaadka | — Xubin |
| 3. — | Xoghaayaha Dowladda Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaga | — Xubin |
| 4. — | Agaasimaha Guud ee Agaasinka Qorsheynta | — Xubin |

Qodobka 7aad

Guddiga Dhexe ee O.H.R.M.ii wuxuu awood u leeyahay:

1. — Maamulidda Sare ee Olalaha;
2. — Soo saaridda amarrada idaariga ah ee loo baahanyahay iyo ujeedooyinka Olalaha iyo maamulka toosan ee lagu hirgelinaayo Olalaha;
3. — Amarro idaari ah ay ku soo saari karaan Wasaarad ama Wakaalad kasta ee looga baahdo inay ka qeyb gaataan O.H.R.M.
4. — Maamulka kharajka ku baxaaya Howlaha Olalaha;
5. — Inuu dejiyo habkii lagu maamuli lahaa Guddiga Joogteynta Ololaha Horumarinta Rer Miyiga iyo Guddiga Teknikada ah ee ka hoos shageeya oo lagu tilmaamay qodobka 4aad ee Sharcigan, saldhiggisana nogonaaya in waxbarashada la joogteeyo.

Qodobka 8aad

Guddiga Gobolka ee Olalaha Horumarinta Rer Miyiga wuxuu ka koobmaa xubnaha Dowladda ee soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| 1. — | Guddomiyaha Gobolka | — Guddomiye |
| 2. — | Guddonshaha Wasaaradda Waxbarashada | — Xubin |
| 3. — | Guddonshaha Wasaaradda Xoolaha, Daaqa | — Xubin |
| 4. — | Agaasimaha Caafimaadka ee Gobolka | — Xubin |
| 5. — | Wakiilka Xafiska Siyaasadda ee Gobolka | — Xubin |
| 6. — | Taliyaha Boliska ee Gobolka | — Xubin |
| 7. — | Mideeyaha Wasaaradda Gaadiidka | — Xubin |
| 8. — | Wakiilka Agaasinka Qorsheynta (halkii uu joogo | — Xubin |
| 9. — | Taliyah aQeybta Xooga (Sector Commander) | — Xubin |

Qodobka 9aad

Guddiga Degmada wuxuu ka koobmaa xubnaha Dowladda soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | — Guddomiyaha Degmada | — Guddomiye |
| 2. | — Guddonshaha Wasaaradda Waxbarashada Degmada | — Xubin |
| 3. | — Guddonshaha Wasaaradda Caafimaadka Degmada | — Xubin |
| 4. | — Guddonshaha W. Xoolaha D. iyo Daaqa ee Degmada | — Xubin |
| 5. | — Wakiilka Xafiska Siyaasadda ee Degmada | — Xubin |
| 6. | — Taliya Booliska ee Degmada | — Xubin |
| 7. | — Taliyaha Nabadsugidda ee Degmada (halkii u joogo) | — Xubin |

Qodobka 10aad

Guddiga Joogteynta guulaha Olalaha Horumarinta Rer Miyiga wuxuu ka koobnaan doonaa:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | — Xoghaayaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha | — Guddomiye |
| 2. | — Xoghaayaha Wasaradda W. iyo Barbaarinta | — Xubin |
| 3. | — Xoghaayaha Wasaaradda Caafimaadka | — Xubin |
| 4. | — Xoghaayaha Wasaaradda Gaadiidka | — Xubin |
| 5. | — Xoghaayaha Wasaaradda Beeraha | — Xubin |
| 6. | — Xoghaayaha W. Xoolaha D. iyo Daaqa | — Xubin |
| 7. | — Xoghaayaha Xafiiska Soyaasadda M.G.S.K. | — Xubin |

Guddiga joogteynta guulaha Ololaha horumarinta rer Miyiga waxay la wareegi doontaa masu-ulna ka nogoneysaa maamulka iyo xilka fulinta howlaha joogteynta O.H.R.M.

Guddiga Joogteynta O.H.R.M waxaa ka hoos shageyn doona Guddi Tekniko ah oo ka kooban hayadaha kor lagu tilmaamay oo isla qodobkan.

Guddiga Teknikada wuxuu masu-ul ka noqonaayaa fulinta iyo hirgelinta howlaha la xiriira joogteynta Ololaha horumarinta rer Miyiga

Qodobka 11aad

Dadka ka qeyb gelaaya Ololaha Horumarinta Rer Miyiga ee gunno gaarka ah xaq u leh waxay u qeybsamaan sida soo socda:

1. — Ardayda ama Gobol kale ha laga soo diro ama Gobolka hore ha u joogeene.
2. — Gulwadayaasha intii loo baahdo.
3. — Gormeeriyaasha aan Dowladda u shaqeyn, kulligood waxay xaq u leeyihiin in la siiyo maalintii Shs. 2 (labashilin) oo cunna ah.

Shagaalaha Wasaaradaha iyo Wakaaladaha u shageeya daraja kasta ha lahaadeene waxay xaq u leeyihiin qofkii maalin waliba Shs. 4 (affarshilin) oo gunnada safarka (indennità di missione).

Haddii Guddiga Gobolka ama kan degmada ay u baahato in dad kale oo mas'uuliin ah ay kaga faa'iidaysato kormeerka wax baaridda Olo-

laha dadkaasi waa in ay Wasaaradda ama Wakaaladaha ay ka shageeyaan ay ka qaataan sahayda habeen dhax ee caadiga ah (indennità di missione).

Qodobka 12aad

Ololaha qeybtiisa caafimaadku wuxuu ka kooban yahay daaweyn iyo talaal.

b) **Daaweynta waxay koobi doonta:**
Cudurrada ayan dadkaasi nasiib iyo garasho midna u helin inay golayaasha caafimaadka ee Gobolka ama Degmada isaga daaweeyaan; qofkii ay cudur weyna kala kulmaan waa inaay u soo diraan golayaalka Caafimaadka ee Gobollada iyo Degmooyinka.

t) **Talaalka wuxuu koobi doonaa:**
Cudurrada aadamiga ahi isku daarto sida furuga, qaaxada, cudurrada curyaanka caruurta keena iwm. ah.

Daaweyntu degma waliba ayay ka socon doontaa, talaalkuna Gobol ayuu u socono doonaa ayadoo kooxaba tallalku ay tegi doonaan degma waliba.

Qodobka 13aad

O.H.R.M. qeybtiisa xannanada xoolaha waxaa ay ka koobantahay daawyn iyo tallalka xoolaha.

Daaweynu Degma waliba ayay ka socon doontaa, tallalkuna Gobol Gobol ayadoo kooxda tallalku ay tegi doonaan degmo waliba.

Qodobka 14aad

Ololaha horumarinta Rer Miyiga qeybtiisa affaraad waa tirada guud ee dadka iyo xoolaha.

Habka noolasha dadka Soomaaliyeed wixii tiradoeda ku saabsan waxaa guudahaan loo qeybiyay seddex qeybood:

1. Reer magaal ku nool magaalooynka dalka Soomaaliyeed, magaalooyinkaas oo lagu tilmaamay in ay yihiin: 64 magaalo madax degmo; Muqdishu iyo tuulooyinka ay ku nool yihiin 15.000 qof iyo wax ka badan. Dadka Soomaaliyeed ee magaalooyinka deggan waxaa lagu tirin doonaa guryahooda.

2. Dadka Soomaaliyeed ee ma-guurtada ah, beeraley ha ahaadeen ama tuulo joog, waxa lagu tiri doonaa buulooyinka, tuulooyinka iyo meelaha kale ee ay deggan yihiin.

3. Reer guuraaga xoola-dhagatada ah waxaa loo fadhiisan doonaa meelaha biyuhu ku hadhaan wagtiga jiilaalka ah, sida ceelasha, waraha berkadaha, durdurraha, laasaska hilooyinka webiyada, kuwa kalana waxaa laagu tagi doonaa meelaha ay deggan yihiin.

Tirada xoolaha, waxaa loo qeybiyay laba qeybood:

1. — tirada xoolaha (dunta) oo ay koobi doonta: ariga, geela, lo'da, fardaha, dameeraha ayagoo kala soocaaya dhedig iyo lab-ood;
2. — tirada xoolaha maguurtada ha oo ay koobi doonto: Beeraha, ceelasha iyo waraha miyiga iyo wixii kale oo qiimo leh.

Qodobka 15aad

Qof kasta oo ka qeyb gala Ololaha Horumarinta Reer Miyiga loona xilsaaray hawl gaar ah wuxuu la mid yahay intii howshaas uu haayo qof howsha Qaranka haya oo ka tirsan Maamulka Guud ee Dawladda.

Qodobka 16aad

Qof kasta oo ka qeyb qaata Ololaha Horumarinta Reer Miyiga ee howshii loo xilsaaray sii xilkasnimo, waddanimo iyo kacanimo uga soo baxa wuxuu ka muteysan doonaa Qaranka iyo Bulshada Soomaaliyeed abaalgud nogon kara «bilad» ama «shahaado sharaf» sida ku tilmaaman sharciga abaabulgudka amba wax kale (Lacag ama dallacaad iyo wixii la mid ah).

Abaalgudka la siinaayo qofka waxaa ka talin doona Guddiga Dhexe ee Ololaha Horumarinta Reer Miyiga, iyo kan Billadaha bixiya.

Qodobka 17aad

Qofkii ku dhinta O.H.R.M. isagoo gudanaayo waajibkiisa haddusan horey Dowladda uga shageyn waxaa loo agoonsanayaa qof ku dhintay howshii Dowladda.

Dadkii dhaxaltooyadiisa lahaa Dowladda waxay gargaar ahaan u siineysaa lacag dhan Shs. 10.000 (tobonkunshilin).

Qofkii dhaawac ku gaaray howsha O.H.R.M. loona aqoonsaday in dhaawacaasu ku gaaray isagoo gudanaaya waajibkiisa waxaa lagu abaalmarinayaa sharciga Badbaadada Shagaalaha lambarkiisu yahay 76 taarikhdiisuna tahay 7 dishembre 1972 iyadoo laga reebaayo howlgabka sharciga u dhigaayo.

Qofkii dan ku leh xuquuqda kor ku tilmaaman — sharci ahaanna xaq u leh xuquuqdaas — wuxuu arji u qoran karaa Dowladda muddo seddex bilood gudaheeda oo laga bilaabo maalinta u dhamaado O.H.R.M. ee ahaa 22 febrayo 1975. Taarikhdaas ka dib xuquuqdaas looma oggolaan karo ciddi soo weydisato.

Qofka xaqa yeelan kara xuquuqda ku tilmaaman xubinta 1aad iyo ta 2aad ee qodobka waa inuu yahay mid ku qornaa — dhibka markii u gaaray (shilku) ka hore — buukta Guddiga Dhexe ee O.H.R.M., kan Gobolka iyo ka Degmada; haddusan ku qorneyn buuktaas wax xaq ah kuma muteysan kara Dowladda.

Qodobka 18aad

Ardalda lagu amro inuu ka qeyb qaato Ololaha Horumarinta Reer Miyiga ee ka soo bixi waaya howshiisa isagoo la imaanin wax sabab ah waxaa loo aqoonsanayaa inuusan xilkas aheyn kana baaqday waajibkiisa wadaniga ah waxaana cigaabtii noqoneysa in: *«Dugsiga laga eryo iyo sanagada qaranka oo aan loo oggolaan illaa muddo laba sanadood, shahaado kasta hala yimaadee xatta dibadda hakala yimaado».*

Guddiga Ololaha Horumarinta Reer Miyiga ee Dhexe wuxuu awood loo siiyay inuu dhiso Guddi Gaar ah oo tilmaam cad ka bixiya habda inta uu le'egyahay dembiga uu geystay ardaygu ayadoo la tixgelinaayo xogwarranka horjoogayaasha, Guddiyada kale ama Guddiga Kormeerka O.H.R.M. iyo marag kale caddeyn kara xilkasnimo darrada ardaygu oo la doonaayo inaay sugnaato.

Qodobka 19aad

Waxaa tilmaan guud u ah daryeelidda horumarinta Reer Miyiga ee sharcigan loo dejiyay waxyaabaha hoos qoran:

1. Howsha O.H.R.M. ee waddaniga ah qiimo dheerna yeelan doono aayaha dambe ee Ummada Soomaaliyeed, waa in lagu fuliyaa si wadajir ah iyadoo laga ilaalinaayo inyar ee qalloc ah gar ahaan tabaqaadkeeda hore.
2. Waa in Wasaarad kastaba qeyb ay ku leedahay O.H.R.M. ka bixisaa amarra ku fadhiyda, qorsheyn, ikuduwid iyo abaabul tifaftiran, waxaana ka masul yihiin fulintooda.
3. Wixii qalab ah ee howlwadennadu u baahanyihiin amba talo amba tilma tixgeliyaan amarrada Guddiyada Sare ee O.H.R.M. iyo ujeedada siyaatadda intaba; waa in lagu kaalmeeyaa dadka howsha wada sida kacaanka jueedadiisa Siyaasiga ah tahay, ama mabda'a Hantiwadaagga ku dhisan tilmaamaayo.
4. Qof kasta waa inuu waddanimo, ahaan qeyb libaax uga qaataa hirgelinta, wada qabashada, daneynta dhammestirka guusha leh ee howshaas u yeelan doono iyo Ummadda Soomaaliyeed faa'iido balaaran oo beddesha dhagaalaheeda caafimaadkeeda, taclinteeda, dhisina doonta Bulsho Caafimaad qabta.

Qodobka 20aad

Wax allale wixii kharay ah ee ku baxaaya Ilolaha Horumarinta Reer Miyiga waxaa laga bixin doonaa misaaniyadda Dhexe ee Dowladda.

Qodobka 21aad

Sharcigan wuxuu dhagan gelaya taarikhdu maray takay 21 Luliyo 1974, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 20 Oktoobar 1974.

*Jaalle S. Gaas Moxamed Siyaad Barre*
*GUDDOONSHAHA*
*GOLAHA SARE EE KACAANKA*

---

**BOGGA LABAAD**
**W. M.**

---

**BOGGA SADDEXAAD**
**W. M.**